



Rädda Barnen

Photo credit: Chris de Bode/Save the Children

**KHUSEYSAA ADIGA OO
DIIDMO LA SIIYAY OO
DOWLADA KA DHUUMAN**

**MALMÖ
HELSINGBORG**



WAXYAABAHA ADIGA XAQA U LEEDAHAY HADDII AAD 18 SANO KA YARTAHAY	3
WAXYAABAHA ADIGA XAQA U LEEDAHAY HADDII AAD 18 SANO KA WEEYNTAHAY	3
ADIGA WAXAAD XAQ U LEEDAHAY DARYEELKA CAAFIMAADKA OO DEGDEGA AH/LAGA MAARMAANKA OO TAASNA SIDA	4
TALO BIXIN OO ARRIMAHA SHARCIYADA	5
KAALMEYNTA DIB UGU NOQOSHADA WADANKAADA	6
QOF LALA TASHADO	7
GURI, CUNTO, DHAR DHAQASHO	7
DARYEEL DAAWEYN IYO CAAFIMAADKA	8
SHAQOQOYINKA KA WARDOONIDA	9
MIYAA ADIGA LAGUGU SUUBIYAY FICIL DEMBI?	9



Photo credit: Chris de Bode/Save the Children

WAXYAABAH AADIGA XAQA U LEEDAHAY HADDII AAD 18 SANO KA YARTAHAY

Maamulka degmada waxaa mas'uul ka saaran iney caawiyaan iyo kaalmeeyaan carruurta degmadaas joogo. Mas'uuliyadaas waa mid saaran degmada markasto oo kuma xirna sababta canuga meesha u joo-go. Xuquuqda carruurta oo UN:k warkiisa waa cadyahay. Dhammaan carruurta isku wada xuquuq. Taasna micnaheeda waxeey tahay in canuga aan haysan ruqsadda deggenaanshada wadanka iyo canuga haysto ruqsadda deggenaanshada isku xuquuq leeyahiin.

Taasna micnaheeda tahay in xitaa carruurta warqado aqoonsi la'aan wadanka joogo xaq u leeyahiin daryeelka caafimaadka iyo

iskuul oo sida carruurta kale oo Iswiidhan ku nool.

Carruurta waxeey xitaa xaq u leeyahiin in xafiiska u adeegida bulshada oo degmada ey ka helaan meel ey seexdaan. Waxaa isla markaasna muhiim ah in adiga aad fahantsantahay in xafiiska u adeegida bulshada qasab ku tahay, haddii la soo weeydiiyo, iney u sheekaan boliiska, Hay'adda socdaalka, maxkamada hay'adda socdaalka, Maxkamada sare oo hay'adda socdaalka ama dowlada meesha aad ku nooshahay.

WAXYAABAH AADIGA XAQA U LEEDAHAY HADDII AAD 18 SANO KA WEEYNTAHAY

Adiga waxaad xaq u leedahay inaa magangelyo codsatid, waa haddii aad wali codsan. Intey Hay'adda socdaalka arrintaada ku mashquulsantahay adiga waxaad xaq u leedahay meel aad ku noolaatid iyo lacagta nolol maalmeedka.

Haddii adiga lagu siiyay go'aan diidmo/tarxiilin adiga caadiyan xaq ma u lahid inaa waxbarashada iskuulka sii dhigatid. 1 juun 2017 waxaa hirgalay isbadal oo khuseeyo carruurta magangelyodoonka oo waalid la'aan wadanka imaadeen iyo bilaabeen waxbarashada dugsiga sare. Sharcigaas ma ahan mid fudud in la fahmo. Sidaas

daraadeed waxaa wanaagsan in adiga aad la xiriirtid iskuulkaada ama ururada bixiyaaan talooyinka sharciyada sidaa u heshid warbixin khuseyso xaaladaada.

Haddii wakhtiga ey kuu qabteen Hay'adda socdaalka dhammaato iyo la doonaayo in adiga wadankaada ku noqotid adiga xaq ma u lahid in lagu siiyo meel aad seexatid ama lacagta nolol maalmeedka. Degmooyinka qaarkood adiga waxaad ka codsankartaa caawinaada degdega, oo tusaale ahaan lacag kaalmo ka codsatid xafiiska u adeegida bulshada.

ADIGA WAXAAD XAQ U LEEDAHAY DARYEELKA CAAFIMAADKA OO DEGDEGA AH/LAGA MAARMAANKA OO TAASNA SIDA:

- ▶ Arrimaha caafimaadka oo deg dega
- ▶ Daryeelid iyo daaweyn oo cudurada/dhaawacyada halista noqon haddii isla markaas wax laga qaban
- ▶ Daryeelid oo ka hortagid ahaan iney xaalada cudurka halis isku badalin
- ▶ Daryeel caafimaad sidii looga hortago inuusan qofka ubaahan daryeelid iyo daaweyn aad u weeyn
- ▶ Qalabka curyaamiinta caawiyo
- ▶ Daryeel caafimaad cudurada cilmi nafsiga
- ▶ Daryeelida caafimaadka hooyooyinka
- ▶ Talo bixinta arrimaha uur ka hortagida
- ▶ Daryeelida caafimaadka oo uur joojinta
- ▶ Caafimaadka oo ka hortagida cudurada la kala qaado
- ▶ Baaritaanka caafimaadka guud (haddii adiga aadan horey usoo suubin)

Adiga waxaad xaq u leedahay turjum iyo isbitaal tagida haddii loo baahdo. Daryeelida caafimaadka oo dadka baahida qaaska u qabo, oo la soo kulmay jir dil oo silcin, aad loogu xad gudbay ama wax ey ka shoogan la soo kulmay, waa in si qaas loo qiimeeyaa iyo baahidooda loogu fiirshaa.





KAALMO

TALO BIXIN OO ARRIMAHA SHARCIYADA

Haddii adiga codsigaada magangelyada diidmo lagaa siiyo iyo go'aankaas hirgalo – waa mid dhaceyso haddii adiga iyo qareenkaada aadan rafcaan ka qaadan go'aan diidmo ah ama ey diidmo ku siiyeen Hay'adda socdaalka, maxkamada hay'adda socdaalka, maxkamada sare oo hay'adda socdaalka – markaas dowlada waxeey rabaan in adiga wadankaadi hooyo ku noqotid. Hay'adda socdaalka weey kaa caawinkartaa qorsheynta safarka oo dib ugu noqoshada wadanka. Haddii adiga aad dareemeysid in marnaba eysan suurtagaleyn inaad wadankaadi dib ugu noqotid waxaa kaliya kuu furan hal fursad – inaad codsatid joojinta go'aanka tarxiilida. Waxaa suurtagal ahaan karo in arrintada wax iska badaleen laakiin Hay'adda socdaalka eysan la socon. Hoostan waxaa ku qoran magacyada oo dhowr urur oo adiga kaa caawinkaro qorida codsi dacwo waa haddii sababo ey jiran.

Stadsmissionen

Arbaco saacada 9.00-12.00

Malmgatan 3, Malmö

0732- 04 03 43

barnpaflykt@skanestadsmission.se

Rådgivningsbyrån

Xafiiska talo bixinta

Talo bixinta telefoonka isniin-arbaco saacada 9.00-11.00

0200-88 00 66

info@sweref.org

Kontrapunkt

Västanforsgatan 21, Malmö

www.kontrapunktmalmo.net/asylstod/

Asylgruppen

asylgruppenimalmo@gmail.com

Haddii arrintaada wali Hay'adda socdaalka ku mashquulsantahay, oo adiga kala shaqeynoosid qorsheynta dib ugu noqoshada wadankaada – oo ku dadaaleeysid sidaa ku heli laheed warqado aad ku safartid, ka soo qeybgashid kulanada aad ballansantahay iyo siisid cinwaankaada saxda – xaaladaha qaarkood waxeey sabab u noqon kartaa in lagu siiyo lacag iyo meel aad ku noolaatid. Qiimeyntaas waxaa mas'uul ka ah Hay'adda socdaalka.



Photo credit: Francesca Leonard/Save the Children

KAALMEYNTA DIB UGU NOQOSHADA WADANKAADA

Bisha cas (Röda Korset) – talo bixin telefoon iyo caawinaad markey noqoto dib ugu noqoshada wadankaada. Talaadooyinka, arbacooyinka iyo khamiisyada saacada 9.30-12.00, telefoonka 020-415 000. Caawinaadooda waa mid ku salisan sidaa adiga dooneysid in wax loo suubiyo.

Hay'adda socdaalka:

- ▶ Adiga waxaad soo codsankartaa lacagta kaalmada oo dib ugu noqoshada wadankaada haddii mid adiga shaqsiyan aad dooneysid oo wadamadan midkood dib ugu noqoneysid Afgaanistaan, Central African Republic, Kongo, Ivory Coast, Eriteria, Iraaq, Jemen, Liiberia, Liibyen, Mali, Sierra Leone, Somalia, Falestiin, Sudan, Koonfurta sudan, Syrien ama Tchad.
- ▶ Haddii adiga tahay muwaadin Afgaanistaan, Iraaq, Nigeria, Marooko, Bakistaan ama Ruush waxaad haysataa fursad ku codsankartid kaalmo oo ka codsanaysid mashruuca yurubiyaanka oo la dhaho ERIN oo waxaad heli kartaa waxbarasho, lacag shirkad ku furatid, qof lala tashado iyo inkale. Qiimo gaari 2500 oo lacagta euro. Haddii arrintaada loo gudbiyay boliiska waxaad heli kartaa kaalmo qiimaheeda gaari 2000 oo lacagta euro.

! Waa inaa kaalmadaas soo codsataa intaadan Iswiidhan ka tagin. La soo xiriir qeybta qaabilaada oo Hay'adda socdaalka sidaa war-bixin kale u heshid.

QOF LALA TASHADO

Rädda Barnen

Ururka baadbaadinta carruurta:

Waxeey leeyahiin telefoon lambar carruurta walwalsan ama doonii qof ey su'aalhooda weeydiistan ey wici karan. Waxaad heli shaqaalo kugu caawinkaro luqadaada hooyo sida luqadaha carabi, dari, bashto, soomaali, tigrini, iswiidhish iyo ingiriis.

Isniin-axad saacada 15.00-18.00
0200 – 77 88 20

Första linjen / BUP

Qadka koowad/Qeybta caafimaadka oo arrimaha cilmi nafsiga oo carruurta iyo dhallinyarada

– Talo bixin telefoon khuseyso adiga jiro ilaa 18 sano oo caafimaad daro hayso cilmi nafsi ahaan oo ku nool gobalka Skåne. Ayaga waxeey ku siin tilmaam iyo talo, iyo haddii aad baahi u qabtid ku siin ballan wakhti.

Isniin-jimco saacada 8.00 – 16.30
020 – 51 20 20

Mötesplats Otto

Goobta wada kulmida oo la dhaho Otto

– Ururka carruurta walid la'aan wadanka imaadan goobta ey ku wada kulmaan iyo dhaq-dhaqaaqyo ku suubiyaan iyo talo bixin.

Östra Förstadsgatan 27

RådRum

Qolka talada

Waxaad ka heli kaalmo iyo talo markey noqoto la xiriirida xafiisyada u adeego bulshada. Ayaga ma badali karan go'aan, soo da'dajinkaran ama go'aanka saameyn kuma yeelan karan wuxuu noqon doono oo codsigaada magangelyodoonida.

Malmö Garaget

Lönngatan 30
Arbacooyinka saacada 12.00 – 18.00

Malmö Stadsbiblioteket

Kung Oscars väg 11
Isniinaha saacada 15.30 – 17.30

Folkets Hus, Rosengård

Goob lagu kulmo oo u furan hawlaha carruurta iyo dhallinyarada, Wachtmeisters Väg 1, Malmö

GURI, CUNTO, DHAR DHAQASHO

Unga Forum

Goobta dhallinyarada

Qubeysasho iyo fursad dhar dhaqasho.

Malmgatan 3, Malmö

Svenska kyrkan

Kaniisada Swedishka

Adiga markaa dooneysid waad la soo xiriir-kartaa kaniisada kugu dhow iyo waa weeydi-inkartaa ayaga haddii ey ku caawinkaran.

Stadsmissionen Skåne

Qubeysasho, cunto o lacag yar iyo dhar dhaqasho oo Malmgatan 14 i Malmö.

Skåne Stadsmission waxeey qeybisaa cunto khamiisaha oo lokaalkooda ku yaal Grönegatan 36, Malmö saacada 9.00-12.00.

Röda Korset

Bisha cas

Cunto axada labaad bilkasto saacada 12.00-15.00 oo **Folkets Park** i Malmö.

DARYEEL DAAWEYN IYO CAAFIMAADKA

Röda Korset

Bisha cas

Kaalmo iyo daryeelid caafimaad dadka warqado aqoonsi la'aan wadanka joogo.

Talo bixin

020 – 21 10 00 (Bilaash)

0709 – 40 67 23 (sms usoo dirid kaliya)

Isniin-khamiis saacada 9.30-11.30

papperslos@redcross.se

Läkare i världen

Dhaqtarada aduunka

Daryeel caafimaad, wareysi xaalada caafimaad iyo warbixin xuquuqda aad u leedahay daryeel caafimaad iyo isbitaal. Adeega daaweynta wareego oo kaniisada S:ta Maria kyrka oo ku taal Södervärnsgatan 8 oo Malmö, khamiis saacada 18.00-20.00.

Stadsmissionshälsan

Kooxda caafimaadka oo Stadsmissionen

Iska imaaw saacadaha meesha ey furantahay oo ma u baahnid inaa wakhti ballansatid. Ka heli xitaa daryeelka caafimaadka ilkaha oo deg dega.

Korsgatan 14

Wakhtiyada ey furanyahiin waxaad ka

heli: [http://www.skanestadsmision.se/](http://www.skanestadsmision.se/verksamheter/stadsmissionshalsan/)

[verksamheter/stadsmissionshalsan/](http://www.skanestadsmision.se/verksamheter/stadsmissionshalsan/)

Folktandvården Skåne

Daryeelka ilkaha oo gobalka Skåne

Daryeelka deg dega ilkaha waxaa loogu talagalay dadka aan xiriir la laheen dhakhtar-ka ilkaha. Koow waa in telefoonka soo wacdaa oo wakhti ballan suubsataa intaadan imaan, saacada 7.30-14.00, telefoon lambarka 0771-55 88 00

<https://folktandvardenskane.se/rad--behandling/akut-tandvard/>

Flyktinghälsan

Caafimaadka qoxootiga

Isniin-jimco saacada 8.30-11.00

Ahlmansgatan 12 oo Malmö

Ring

112

Soo wac 112 haddii xaalado ey deg deg tahay oo qof noloshiisa, hanti ama deegaanka halis ku jiro. Xaalad deg dega waa marka adiga caawinaad deg dega u baahantahay oo ambulans, dab daminta, boliiska, diyaarad, bada, dhul baadiyo, wadaada heegaanka ama warbixin ku saabsan sunta.

Ring

1177

Soo wac 1177 oo wixii su'aalo ku saabsan daryeel iyo caafimaad. Ayaga waxeey kaa caawinkaran meesha aad la xiriiri laheed iyo ku siin talo haddii adiga ama qof ehel uu jiranyahay.

SHAQOYINKA KA WARDOONIDA

Socialarbetare för ungdomar

Shaqaalaha bulshada u adeego oo qaasatan dhallinyarada

Shaqadooda baa ah kordhinta ammaanka iyo nusqaaminta ficilada dembiyada dhallinyarada Malmö suubiso.

Telefoonka 070-600 35 36
socialarbetare@malmo.se.

Mobila teamet

Kooxda wareegto

Waxaad ka heli wadooyinka Helsingborg oo shaqadooda waa sugida ammaanka. Haddii aad dooneysid qof weey aad la hadashid iyo ka yartahay 18 sano soo wac, 042-10 75 32.

Ensamma barn på flykt

Carruurta kaligood qoxootiga ah

Waxaad ka heli wadooyinka Malmö oo waxeey kaalmeeyaan carruurta iyo dhallinyarada warqad aqoonsi la'aanta ah. Shaqaalaha waxeey ku hadli dari iyo carabi.

Telefoonka 0732-04 03 43



Photo credit: Louis Leeson/Save the Children

Social jour

U adeegida bulshada heegaanka

oo Malmö waxaad ka heli saacada 8.00-3.00 oo xaaladaha deg dega oo u adeegida bulshada lambarka telefoonkooda waa 040-34 56 78.

Degmada Helsingborg saacadaha shaqada oo isniin-jimco waxaad soo wici xafiiska qaabilsan u adeegida bulshada telefoon lambarkooda 042-10 64 56 ama booqasho ugu imaan Bredgatan 17.

Xilliyada fiidka iyo maalmaha fasaxa adiga waxaad la soo xiriiri kooxda heegaanka oo u adeegida bulshada oo Berga allé 25.



Photo credit: Farzana Hossen/Save The Children

MIYAA ADIGA LAGUGU SUUBIYAY FICIL DEMBI?

Iswiidhan kama ahan dembi qofka inuu iibsho galmo laakiin waa dembi qof inuu qofkale galmo suubin ka iibsado. Haddii adiga lagugu qasbay inaa iibisid galmo ama suubisid ficil dembi, la soo xiriir shaqaalaha isku xiriiriyaha oo gobalka sidey talo iyo kaalmo kuu siiyaan, telefoonka 020-35 40 40. Shaqaalahaas adigoo magacaada u sheegin waxaad xitaa kala xiriiri kartaa bogga internetkooda: <http://malmo.se/Social---familjefragor/Personligt-stod/Kompetenscentrum-sexuella-tjanster-KST.html>

Haddii adiga lagugu suubiyay ficil dembi waxaa wanaagsan koow inaa la xiriirtid boliiska oo wac 11414 ama xafiiska u adeegida bulshada, oo waxeey kaa caawin iyo kaa kaalmeyn la xiriirida boliiska iyo suubinta ashkood dembi. Waxaa wanaagsan inaad warbixin ka haysatid iney dhicikarto markaa boliiska la kulantid in boliiska kugu xiran meesha dadka laga gaaray go'aanka tarxiilid/wadan ka saarida. Haddii adiga ka yartahay 18 sano halistaas aad bey u yartahay.

Haddii aad la kulantid xaalad deg deg ah, markaa adiga caawinaad deg deg ah u baahatid, adiga waxaad markasto soo wici 112.